

# Ogeysiiska

**Bilowga hore ee shaqooyinka goobta ayaa ka bilaabmaya**



## **Banksia Gardens**

Laga bilaabo Luulyo ilaa September 2024, bilowga hore ee shaqooyinka hore ayaa bilaabmi doona inay u diyaariyaan goobta dhismayaalka guryaha cusub ee bulshada ee Banksia Gardens.

### **Waxa la filan karo**

- Shaqooyinka waxay ku koobnaan doonaan meela shaqo oo deyr ku wareegsan yahay iyadoona si dhow loola socon doono.
- Xoogaa sawaxan iyo boodh ah, iyo dhaq-dhaqaaq dheeraad ah oo gawaarida waaweyn ah ayaa ka jiri doona Coleraine Street.
- Waxaan ku da'daali doonaa inaan yarayno wax kasta oo culeys keeni kara.
- Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan noogu soo dir emailka [banksiagardens@homes.vic.gov.au](mailto:banksiagardens@homes.vic.gov.au).



## Saacadaha shaqada

- Isniinta ilaa Jimcaha 7:00-da subaxnimo ilaa 5:30-ka galabnimo
- Sabti 8:00-da subaxnimo ilaa 4:00-ta galabnimo

Waad ku mahadsan tihiiin dulqaadkiina inta aan wadno shaqooyinkan muhiimka ah.

## Faahfaahinta shaqada

<b>Luulyo 2024</b>	<b>Baaritaannada goobta ee waddada Coleraine Street - ilaa saddex maalmood</b> <ul style="list-style-type: none"><li>• Kuwa haga gawaarida ayaa sahli doona in si badbaado leh loo galo waddooyinka, meelaha lagu lugeeyo iyo meelaha waddooyinka laga gooyo. Fadlan la soco oo ku dhaqan dhammaan calaamadaha badbaadada.</li></ul>
<b>Laga bilaabo Luulyo ilaa September 2024</b>	<b>Ilaalinta iyo saarida dhirta</b> <ul style="list-style-type: none"><li>• Qorshaha maaraynta geedaha ayaa la samayn doonaa, oo ay ku jiraan aagagga ilaalinta geedaha.</li><li>• Dhirta caafimaadkoodu liidato, ee ay saamaysay shaqooyinka dhismuhu, ama keeni kara khatar ayaa si badbaado leh loo saaraya.</li></ul>
	<b>Saarista ciida iyo nadiifinta</b> <ul style="list-style-type: none"><li>• Shaqaaluhu waxay meesha ka saarayaan barxadda kubbadda gacanta iyo shabaqyada cricket-ka si ay ugu diyaariyaan aagga dhismaha guryaha cusub.</li><li>• Dhamaan ka saarista ciidda waxa loo maarayn doonaa si waafaqsan xeerarka deegaanka iyo badbaadada taas oo ay sameyn doonaan qandaraaslayaal xirfad u leh. Sida uu dhigayo sharciga badbaadada, shaqaalaha waxaa looga baahan yahay inay xidhaan dhar badbaado oo cad.</li></ul>

## Badbaadada goobta

Caafimaadka iyo badbaadada bulshada Banksia Gardens ayaa ah waxa aan mudnaanta siinayno. Goobta shaqada waxaa geli kara qandaraaslayaasha oo keliya.

Dhamaan shaqooyinku waxay u hoggaansami doonaan xeerarka WorkSafe Victoria iyo Maamulka Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Authority - EPA) ee Victoria.

## Wax badan ka ogow

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruucan iyo agabka la turjumay, fadlan booqo [homes.vic.gov.au/banksia-gardens-broadmeadows](https://homes.vic.gov.au/banksia-gardens-broadmeadows).

Haddii aad rabto nooc la heli karo ama la fasiray oo ah xogtan soo cusboonaatay, iimayl u dir [banksiagardens@homes.vic.gov.au](mailto:banksiagardens@homes.vic.gov.au)